

Haddii aad tahay qof heysta carruur billaabeysa fasalka 7

2020-01-21

Hadda waxaa la gaaray waqtigii la dooran lahaa iskuulka xilligiisa sanad dugsiyedka dayrta ee 2020

Sanadkaan waxaa iskoollada degmooyinka laga billaabaya doorasho iskuul oo ka billaabaneysa fasalka 7, waa sistem cusub oo lagu bixiyo boosaska iskuullada. Haddii aad heysato carruur billaabeyysa fasalka 7 xilliga sanad dugsiyedka dayrta sanadka 2020 waxaad carruurtaada u codsaneyysaa iskuul. Waa muhiim in aad adiga ka waalid ahaan sameyso doorasho rasmi ah. Waxaad codsigaaga ku aaddan isuulka ku direysaa adeegga elektarooningga ah ee loogu tala galay doorashada iskuulka lagana helayo bogga degmada www.norrkoping.se/skolval

Waxaad codsigaaga ku aaddan isuulka dirtaa inta u dhhexeya 12 bisha febraayo iyo 26 bisha febraayo.

Adeegga elektarooningga ah wuxuu furmayaa 12 bisha febraayo wuxuuna xirmayaa 26 bisha febraayo 2020. Inta lagu guda jiro muddadaas waad geli kartaa adeegga elektarooningga ah waxaadna gudbin kartaa codsigaaga ku aaddan iskuulka aad rabto. Marka aad geleyso adeegga elektarooningga ah waxaad dalabkaaga ku saxiixee tusaale ahaan is sheegidda elektarooningga sida adigoo isticmaalaya moobayl bank.id. Labada qof oo leh masuuliyadda sharchiyeed ee carruurta waa in ey saxiixaan si uu dalabka sax u noqdo.

Waa muhiim in codsigaaga aad dhiibataa ugu dambeyn 26 bisha febraayo 2020. Waxaan ka duuleynaa codsigaaga inta ey macquulka tahay. Haddii aadan dalbasho iskuul oo rasmi ah sameyn waxuu cunugaaga boos ka heleyaa mid ka mid iskuullada ey boosaska ka bannaan yihiin ee degmada isla markaana ku yaalla meel masaafo macquul ah gurigaaga u jirta.

Jawaabta boosaska iskuulka la helay waxey imaaneysaa bisha maarso 2020

Bisha maarso waxaad heleysaa jawaab hordhac ah oo ku saabsan iskuulka uu cunugaaga boos ka helay. Jawaabta waxaa lagu soo daabacayaa adeegga elektarooningga ee dalbashada iskuulka adigana waxaa kuu soo dhacaya sms ama iimeel marka lasoo jawaabo. Gal adeegga elektarooningga si aad u akhrisato jawaabta. Jawaabta kama dambeysta ee ku saabsan iskuulka la geynayo guriga aaya warqad ahaan laguugu soo diraya.

Warbixin dheeraad ah ka akhriso www.norrkoping.se/skolval

Bogga internetka ee degmada waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan doorashada iskuulka ee fasalka 7. Halkan waxaa tusaale ahaan yaal warbixin ku saabsan iskuullada degmeed ee ku yaal Norrköping iyo sharciyada kala horreyn ee ka jira doorashada iskuul ee fasallada 7.

Su'aalo ma qabtaa ama caawimaad ma u baahan tahay?

Booqo www.norrkoping.se/skolval si aad u akhrisato su'aalo iyo jawaabo. Waxaad kaloo su'aalahaaga ula tegi kartaa xarunta xiriirka ee degmada oo uu nambarkoodu yahay 011-15 00 00. Waxaad xattaa booqan kartaa xarunta xiriirka oo ku taal Trädgårdsgatan 21 ee Norrköping.

Waad ku mahadsantahay in aad dhiibaneysid codsigaaga iskuul.